



Waxaa lagu siin doona fursadda daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah

Waxaa lagu siin doona fursadda daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah, taasoo ku salaysan baahida daryeel-caafimaadeedka aad u qabto iyo waxkaqabadyada iskudabaridan. Macnaha daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah waxaa weeyaan, in lagu siin doono daryeel-caafimaadeed sugan, kaasoo siiba gurigaaga lagugu siin doono. Taasoo ku suurtagelin doonto inaad u baahan booqashada rugta daryeel-caafimaadeedka ee badan ama isbitaalada.

Laakinse awooda doorashada daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah adiga iska leh. Haddii daryeelka noocaas aadan doonayn waxaad daryeel-caafimaadeedka awgiis booqan karta xarumaha daryeel-caafimaadeedka. Haddiise aad raali ka tahay in lagu siiyo daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah, waa lagugu qori doona kaddib hawlwadeneeyada ayaa iskudabari doono dhammaan baahida aad daryeel-caafimaadeedyada u qabto.

Adeegyada daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah waxay ka kooban yihiin:

- **Koox shaqaalaha caafimaadka**
Kooxda shaqaalaha caafimaadka ka kooban takhtarrada Gobolka Skåne iyo kalkaalisada caafimaadka degmada ayaa ku caawini doono, markii aad doorato daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraad ah. Markii aad u baahato inaad la kulanto shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka oo nooc kale ah, waxaa taasi ku qorshayn doonaan kooxda.
- **Booqashada guriga takhtar iyo kalkaalisada caafimaadka**
Markii aad daryeel-caafimaadeed u baahato guriga ayaa lagugu soo booqanaya, xitaa markii daryeel-caafimaadeed degdeg u baahan tahay guriga ayaa lagugu soo booqanaya.
- **Fursad toos isbitaalka lagu seexiyo**
Haddii aad u baahato daryeel-caafimaadeedka isbitaalka, waxaa taasi kula qorshayn

doono kooxda. Toos ayaa lagu seexin kara waaxda isbitaalka ee aad ka tirsan tahay.

- **Qorshaha daryeel-caafimaadeedka ku gaarka ah oo iskudabaridan**
Anaga iyo adigu wadajir ayaan ugu dhaqaaqi doona, qorshaynta daryeel-caafimaadeedkaaga hadba baahidaada. Qorshaha noocaas ah waxaa loo yaqaanno qorshe-shaqsiyeedka iskudabarida (SIP). Waa qorsha aan qabyo ahayn ku siinaayo adiga, qaraabadaada iyo shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka muqaalka xaaladaada aan qabyo ahayn. Dejinta qorshaha noocaas kahor waa in la hela oggolaanshadaada.

Markii aadan u baahnayn daryeel-caafimaadeedka guriga oo dheeraadka ah, waa laga saari doona liiska kaddib waxaad daryeel-caafimaadeed ka raadsan karta rugta daryeel-caafimaadeedka aad ka tirsan tahay ama booqan karta kalkaalisada caafimaadka degmada haddii aad u baahato.

Xiriiriyahaaha waa:
